Companion™ card

VICTORIA

Somali

Cardholder Handbook

Buugga Qofka Haysta Kaarka Fiktooriya

COMMUNITY SUPPORT FUND VICTORIA

Victoria The Place To Be

Buugga Qofka Haysta Kaarka

Sebtember 2003

Waxaa soo saaray Adeega Wasaaradda Aadanaha ee Fiktooriya, Melbourne, Fiktooriya.

© Xuquuqda Koobiga waxaa iska leh Dawlad Goboleedka Fiktooriya, 2003.

Bedelaad ama wax ku darid laguma samayn karo dukumintigaan, lamana gadi karo ama maarayn karo si aan ku haboonayn.

Dawlad Goboleedka Fiktooriya waxay ogoshahay oo dhiirigelisaa dib u soo saarida dukumintigaan, waase inuu sax yahay lana aqoonsadaa Dawlad Goboleedka Fiktooriya inay tahay kuwa xuquuqda daabacaada iska leh.

Companion Card™ waa astaanta-ganacsi oo Dawlad Goboleedka Fiktooriya.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan koobiyada Buugga Qofka Haysta Kaarka loo yaqaan Companion Card ee Fiktooriya waxaa laga helli karaa websaytka Companion Card (Kaarka Qofka-La-Socda) oo ah: **www.companioncard.org.au** ama wac khadka macluumaadka Companion Card:

1800 650 611

Tusmada Buugga

Wixii ku saabsan buuggaan	4
Qeexitaanka erayada	4
Maxaa loo sameeyey kaarka Companion Card?	5
Waa maxay Kaarka Qofka la socda (Companion Card)?	6
Sidee u isticmaalayaa?	6
Yaa noqon ka qofka la socda?	6
Xaggee ku isticmaali karaa kaarka Companion Card?	7
Immisa ayuu ku kacayaa?	7
Yaa dalban kara?	8
Sidee ku ogaanayaa haddii iintaydu joogto tahay?	8
Sidee ku muujin karaa in aan xaq u leeyahay Companion Card?	9
Maxaa dhacaya haddii aanan xaq u lahayn Companion Card?	9
Cusboonaysiinta Companion Cards	9
Si xun u isticmaalida kaarka Companion Cards	10
Dacwooyinka / ciilqabka	10
Bedelaada kaararka	11
Bedelaada cinwaanka	11
Helida macluumaad badan oo ku saabsan Companion Card	11
- Websaytka Companion Card	11
- Khadka Macluumaadka ee kaarkaCompanion Card	11
- Sidee lagu helli karaa khadka luqadaha kala duwan ee macluumaadka Companion Card	12
Macluumaadka loo baahan yahay si loo buuxiyo foomka dalabka qofka kaar sitaha	12
Shuruudaha Qofka sita kaarka	16
Macluumaad siyaada ah	17
- Wixii macluumaada ee intaas ka badan oo khuseeya adeegyada kale ee iinta	17
- Macluumaad siyaada ah oo khuseeya adeegyada iinta iyo xuquuqdaada	17
Barayfasiga	19

Wixii ku saabsan buuggaan

Buuggaan ujeedadiisu waa inuu kaa caawimo inaad fahamto sida Comapnion Card (Kaarka Qofka-La-Socda) u shaqeeyo. Waxaa laga yaabaa in uu kaa caawimo inaad goáan ka gaarto inaad dalbato iyo in kale

Buuggu wuxuu ku siinayaa faahfaahin ku saabsan xuquuqda iyo masuuuliyaadka saaran qofka kaarka sita. Sidoo kale, buuggu wuxuu sharxayaa sida lagu hello foomam iyo macluumaad siyaada ah, wuxuuna qorayaa liiska meela kale oo laga helli karo macluumaad laga yaabo inay ku anfacaan

Waxaa waajiba in la akhriyo buuggaan intaan la buuxin foomka. Sharxaada macluumaadka lagu codsaday foomka dalabka waxaa lagu daray qaybta buuggaan ee " Macluumaadka Loo Baahan Yahay si loo Buuxiyo Foomka Dalabka Qofka Kaarka Haysta". Foomka dalabku waxaa isaguna lagu daray buuggaan. Waxaa la soo jeedinayaa inaad xafido buuggaan si aad ugu isticmaasho tixraac ahaan hadda wixii ka dambeeya.

Qeexitaanka erayada

“Cardholder” (Qofka haysta Kaarka) – wuxuuu tixraacayaa qof, leh iin, taas oo laga yaabo inay la xiriirto da’da, jiro maskaxeed, dalabkiisa kaarka Companion Card-na la aqbalay, faahfaahintiisuna iyo sawirkiisuna ka muuqdaan kaarka Companion Card.

“Companion” (Qofka-la-socda) – Barnaamijkaani wuxuu isticmaalaa erayga "companion" si uu u sharxo caawime ama daryeelle lacag la siiyo oo raaca qof kaar haysta, si uu ugu suurtageliyo in qofkaasi hello ama ka qaybgalo xarakaadka bulshada.

“Affiliate” (Kuwa la shaqeeya ama ku xiran) – waxaa loo isticmaalaa in lagu sharxo ururada, ganacsiyada iyo meheradaha lacagta qaada si ay ugu ogolaadaan gelitaan ama ka qaybgelid, kuwaas oo si rasmi ah ugu diiwaan gashan inay aqbali doonaan Companion Card. Ganacsiyada ku salaysan Fiktooriya, kuwaas oo ay ka mid yihiin kuwa wadanka oo dhan ka hawlgala ama meherado leh (baarar, dukaamo, naadiyo iwm) ayaa loo ogol yahay inay ku jiraan.

“Companion Ticket” (Tikidka qofka la socda) – waa tigid labaad ama ogolaansho la siiyey qofka la socda, marka ay lagama maarmaan tahay in qofka kaardhka sita loo raaco munaasabada/xarakaadka.

Maxaa loo sameeyey kaarka Companion Card?

The Victorian Network On Recreation and Disability (VICNORD) ayaa keenay macnaha Companion Card taas oo looga jawaabayey dareenka joogtada ah ee khuseeya dadka iinta leh, kuwaas oo u arkay nadaamka lacag qaadida ee goobaha madadaalada, meelaha lagu nasto ama raaxaysto/xarakaadyadu in ay yihiin kuwa ku shaqeeya nadaamka takoorida.

Dadka leh iinta oo u baahan inay hellaan caawimo si ay u tagaan goobaha bulshada iyo xarakaadyada waxay xaq u leeyihiin inay si siman uga qaybgelaan hawlaha bulshada. Xuquuqdaan asaasiga ah waa la ilaaliyey sida waafaqsan qodobka 42aad ee Xeerka Usinaanta Fursadaha 1995 (Vic) iyo qodobka 8aad ee Xeerka Takoorida Iinta 1992 (Dawlada Dhexe). Labadaan xeerba waxay ka dhigeen sharci daro in la takooro qof u baahan caawimada qof-la-socda.

Waqtiyadii hore, waxaa looga baahan jiray qofka iinta leh oo u baahan caawimo qof-la-socda si uu uga qaybgalo munaasabado/ xarakaadyo bulsho, inuu bixiyo laba lacagood, mid naftiisa ah iyo mid qofka la socda, si uu meeshaas u galo.

Sidaasi waa takoorid sababtoo ah waxay laban laabaysay lacagta uu ku geliyo qofka iinta lihi meesha uu rabo/rabto inuu galo.

Tira dad ah oo leh meelaha/xarakaadyada ayaa isku deyey inay wax ka qabtaan arrintaan sinaan laáanta ah waxayna u ogolaadeen in qofka la socdaa lacag laáan ku galo. Maalintaasa, si kasta ha ahaatee, ururadaani ma aanay haysan hab sahlan ama joogta ah oo muujinaya cida sharci ahaan u baahan qof-la-socda.
Kaarka loo yaqaan Companion Card ayaa loo sameeyey si kor loogu qaado xuquuqda jirta oo dadka iinta leh si ay u hellaan tigid xaq ah. Maaha mashruuc lacag dhimid, u dhaafid ama macaysh doon ah.

Kaarka Companion Card waa mid si sahal ah u muujinaya baahida qof-la-socda, wuxuuna ka caawimayaa in ganacsatadu raacdo sharciga lidka-takoorida ee khuseeya.

Kaarka Companion Card maaha barnaamij faaiido doona. Maamulka barnaamijka waxaa kharajkiisa bixiya Dawlad Goboleedka Fiktooriya waxaana lagu meeleeyaa hayáda Community Support Fund, Strategic Initiatives Fund.

Waa maxay Kaarka Qofka-la-socda (Companion Card)?

Kaarka Companion Card waa kaar la gelin karo boorsada jeebka waxaana la siiyaa dadka iinta leh, iintaas oo la xiriiri karta da'da iyo jiro maskaxeed. Kaarka waxaa ku dhegan sawirka qofka kaarka leh kaas oo u baahan caawimada qofka-la-socda si uu u tago munaasabad ama goob/xarakaad.

Kaarka Companion Card wuxuu kor u qaadaa xuquuqda dadka iinta leh si ay galaan munaasabadaha/xarakaadyada bulshada, iyadoo aan laga qaadin lacag siyaada ah sababtoo ah waxay u baahan yihiin qof-la-socda. Maaha kaar ka dhimis ama u dhaafid, mana siiso dadka iinta leh faaiido lacageed oo dadka kale aanay hellin.

Sidee u isticmaalayaa?

Kaarka Companion Card waxaa la muujiyaa marka tigidhka la goosanayo, waxaase shardi ah in qofka kaarka wataa u baahan yahay caawimada qof-la-socda si uu u tago munaasabada ama xarakaad. Ururada ka qaybgelaya ama xiriirka la leh ayaa aqoonsan doona kaarka Companion Card waxayna siin doonaan tigid labaad qofka la socda iyadoo aan lacag laga qaadin.

Dadka haysta kaararku waxay isticmaali karaan keliya kaarkooda si ay u hellaan tigidka qofka la socda haddii aanay helli karin ama ka qaybgeli karin munaasabadaas mucayinka ah iyadoo aanu caawimayn qof la socdaa.

Guusha iyo fidinta Companion Card wuxuu, qayb ahaan, ku xiran yahay sida wanaagsan ee uu u isticmaalo qofka sita kaarka iyo kuwa barnaamijka qaybta ka ah. Isku deyida isticmaalida Companion Card marka aan loo baahnayn qofka la socda waxay wax u dhimaysaa rabitaanka ganacsatadu kaga qaybgelayaan barnaamijka.

Yaa noqon kara qofka-la-socda?

Qofka la socda waxaa looga jeedaa qofka uu doortay qofka sita kaarka si uu uga caawimo in uu galo munaasabad ama xarakaad. Qofka la socdaa wuxuu noqon karaa qof lacag la siiyo ama mid aan la siin, taasina waa is bedeli kartaa iyadoo ku xiran xarakaadka iyo munaasabada.

Qofka looma arki karo qof-la-socda haddii qofka kaarka wata ula socdo si caadi ah ama sabab madadaalo darteed, isagoo aan siinayn kaalmada uu u baahan yahay qofka kaarka wata si uu u hello ama uga qaybgalo munaasabada/xarakaadyada.

Xaggee ku isticmaali karaa kaarka Companion Card?

Kuwa ka qaybqaadanayaa waa ururo, ganacsato iyo meherado gelitaanka ama ka qaybqaadashada lacag ku qaata, rasmi ahaana ku diiwaangashan inay ka qaybgelayaan barnaamijka Companion Card Program. Ganacsatada ku salaysan Fiktooriya, oo ay ku jiraan kuwa leh hawlo ama meherada wadanka oo dhan ah ayaa noqon kara xubno ka qaybqaadasho.

Barnaamijka Companion Card wuxuu ka jiraa Fiktooriya waxaana lagu asaasay dadaal ka bilawday Fiktooriya goobaheeda kuna waajahnaa goobaha madadaalada, nasashada, iyo goobaha xarakaadyada/ munaasabadaha dhaqan iyo bulsho. Eeg loogada gaarka u ah Comapanion Card oo lagu muujiyey irida goobaha ganacsiga ama qalabka ay iidhedooda ku muujiyaan.

Companion card
Accepted Here

Dadka wada xarakaadyada/munaasabadaha qaarkood ayaa laga yaabaa in aanay ogeyn Companion Card (ama aanay muujin loogada), laakiinse aqbalaya kaarkaaga haddii aad tusto ama u sheegto wuxuu yahay. Si aad u hesho wixii macluumaada ee ku saabsan Compnion Card iyo sida lagu ogaado lagagana mid noqdo barnaamijka kaarkaaga gadaashiisa waxaa ku yaal websayt muujinaya nambarka iyo telefoonka kuwa aqbalaya xarakaadyada iyo munaasabadaha. Waxaa loo malaynayaa marka arrintaan la shaaciyaba, ururo iyo ganacsato badan ayaa ka qaybgeli doona barnaamijka sidaas darteedna aqoonsan doona xuquuqda dadka u baahan kaarka qofka-la-socda.

Immisa ayuu ku kacayaa?

Kaarka Companion Card waxaa kharajkiisa bixiya Dawlad Goboleedka Fiktooriya waxaana fuliya hayáda Community Support Fund, Strategic Initiatives Fund, waxaana lagu bixiyaa lacag laáan.

Yaa dalban kara?

Kaarka Companion Card dadka dalabanayaa waa inay buuxiyaan shuruudaha ay dhigtay Wasaarada Adeega Aadamiga, iyadoo ku salaysan Xeerka Adeegyada Iinta 1991 (Vic). Waad dalban kartaa, si gaaban, kaarka haddii:

1. Aad qabto iin, ay ka mid noqon karto jiro la xiriirta da'da iyo jirada maskaxda; iyo
2. Haddii iintaadu tahay joogto – ama ay u badan tahay inay noqoto mid joogta ah; iyo
3. Haddii aad u baahan tahay qof kula socda si aad u hesho ama tagto xarakaadyada ama munaasabadaha bulshada; iyo
4. Haddii aad ku nooshahay Australia, ama aad degan tahay Australia oo aad haysato fiisa aan dhicin; iyo
5. Haddii dalabkaaga iyo sawirkaaga uu saxiixay sarkaalka ku shaqada lihi.

Ma jiro shardi la xiriira inta dhaqaalahaagu leég yahay si aad u dalbato Companion Card, dadkuna waa dalban karaan iyadoo aan ku xirnayn xaalladooda shaqo ama dhalasho.

Ma jirto shardi daéed oo ku xiran cida dalban karta Companion Card, laakiin dalbadayaasha da'doodu ka hoosayso 18 sanadood waa in waalidkood ama wakiilka sharciga ahi u saxiixaa dalabka.

Tas-hiilaadka, ururada ama dadkalaga yaabo inay mar walba la socdaan ma dalban karaan Companion Card. Kaararka waxaa la siin karaa keliya, qofka iinta leh mar walbana kaarku wuxuu ahaanayaa hantida qofkaas. Taasi waxay u suurtagelinaysaa qofka kaarka wata inuu doorto qofka uu doonayo inuu u raaco xarakaadyada/ munaasabadaha.

Dalabka lama xerayn karo iyadoo lagu hadlayo magaca dalbadaha, iyagoo aan raali ka hayn, marka laga saaro waalidka ama wakiilka sharciga ah.

Sidee ku ogaanayaa haddii iintaydu joogto tahay?

Iimaha joogtada ahi waa kuwa u badan inay ku hayaan ama qabto inta noloshaada ka hartay, xataa haddii dhibta iintu isbedbedesho.

Iimaha aan u badnayn inay sii jirayaan inta noloshaada ka hartay looma arko inay yihiin iin joogta ah, xataa haddii ay mudda sii jirayaan.

Sidee ku muujin karaa in aan xaq u leeyahay Companion Card?

Waxaad ku muujin kartaa Companion Card laba arrimood midkood:

1. Inaad hadda qaadato mid ka mid ah kaalmooyinka mucayinka ah ama adeegyada ku qoran Foomka Dalabka Qofka Kaarka haysta. Dadka hella kaalmadaas ama adeegaas horay ayey u mareen qiimaynta muujisay baahidooda kaarka loo yaqaan Companion Card.

AMA

2. Waad noo sheegi kartaa sababta aad ugu baahan tahay qof kula socda si aad uga qaybgasho hawlaha bulshada;
   - Xagga wada xiriirka
   - Barashada/qorshaynta/fekerka
   - Socodka
   - Daryeelka shakhsiyeed

Maxaa dhacaya haddii aanan xaq u lahayn Companion Card?

Kaarka Companion Card waxaa la siin doonaa dhamaan dadka buuxiya shuruudaha loo baahan yahay. Waxaa jiri kara xaalladu, kuwaas oo qofka laga yaabo inuu qofku u baahdo in qof la socdo laakiin haddana aan sharciyan la siin karin. Masaal waxaa ka mid ah qof ay haysato iin muda gaaban ahi. Xaalladaha kuwaan oo kale ah, waxay ku xiran yihiin qofka iyo kuwa wada goobta/ xarakaadka inay kala gorgortamaan hab kale si ay u qanciyaan baahida tigidka qofka-la-socda.

Cusboonaysiinta Companion Cards

Kaararka Companion Cards waxay shaqaynayaan shan sano laga bilaabo maalinta la bixiyey. Mudadaas wixii ka dambeeya dhamaan dadka haysta waxaa looga baahan yihiin inay cusboonaysiiyaan kaarkooda. Mudada cusboonaysiintu waxay ku salaysan tahay-

- Kaarka inta laga fili karo inuu jiri karo (gabowga);
- Mudada sawirku noqon karo mid ka tarjumaya sida uu u muuqdo qofka kaarka sitaa;
- Baahida kaalmada qofka kaarka haysta oo isbedeli karta.

Si aad u cusboonaysiiso kaarkaaga, waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso foomka Dalabka Qofka Kaarka Haysta dabadeedna ku soo celiso Barnaamjika Companion Card Program.

Waxaad dalban kartaa kaarkaaga cusub ilaa 6 bilood inta aanu dhicin kaarkaagu.

Si xun u isticmaalida kaararka Companion Cards

In si xun in loo isticmaalo Companion kaarka aad ayaa loo yareeyey iyadoo la adkeeyey habka dalbashada si loo xaqiijinayo in Companion Card gaaro cida loogu talagalay.

Kaarka naftigiisa waxaa lagu sameeyey farsamooyin amniyeed oo badan. Ururada ka qaybgelayaa qorshahaan ayaa awoodi doona inay xaqiijiyaan macluumadka qofka sita kaarka marka boos qabsiga la samaynayo ama marka tigidka la bixinayo. Kaarka oo si khalada loo isticmaalaa wuxuu keeni karaa in kaarka la laalo (la joojiyo isticmaalakiisa).

Guusha fiditaanka mustaqbilka barnaamijka Companion Card waxay, qayb ahaan, ku xiran tahay dadaalka wanaagsan ee isticmaalaha iyo kuwa kaarkaani khuseeyo. Dadka kaarka sita waxaa laga codsanayaa inay soo qadimaan kaarkooda si ay ugu isticmaalaan meheradaha keliya markay u baahan yihiin si qof la socdaa uu uga caawimo helitaanka munaasabadaha/xarakaadyada. Isku deyida isticmaalida kaarka marka aan loo baahnayn qof-la-socda qofka waxaa laga yaabaa inay sababto kaarka oo la laalo iyo ganacsatada oo ka baxda barnaamijka. Kani wuxuu khatar gelin karaa barnaamijyada dadka kale.

Dacwada / Ciilqabka

Haddii aad qabto dacwad ku saabsan aqoonsiga Companion Card, ama arrimaha la xiriira gelida si ula dhaqmid ka timid munaasabadaha/xarakaadyada, waa inaad marka hore raadisaa inay xaliyaan arrinta dadka maamulka ganacsiga ama xarakaadyada gacanta ku hayaa. Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabta aad ka hesho goobta ganacsiga/xarakaadyada, waxaa laga yaabaa inaad la xiriiri karto hayádaha ku qoran buuggaa gacanta kuna hoos qoran "Macluumaad Siyaada ah".

Haddii aad ka ciilqabto Natiijada Dalabkaaga Companion Card, waxaad ku xerayn kartaa dacwad Barnaamijka Companion Card. Wac Khadka Macluumaadka ee Companion Card wixii faahfaahin ah oo ku saabsan sida loo sameeyo dacwadaas.

Bedelaada kaararka

Waad codsan kartaa in lagaa bedelo kaarka haddii -

- Aad lumiso kaarkaaga Companion Card,
- La xado Companion Card-kaaga ama uu xumaado,
- Aad bedesho magacaaga,
- Sawirkaagu u baahan yahay in lagu muuqaalkaaga hadda ah.

Si aad u codsato kaar, waxaad u baahan tahay inaad buuxiso foomka bedelida/bedelaada faahfaahinta dabadeedna ku xerayso Barnaamijka Companion Card program.

Bedelaada cinwaanka

Haddii aad doonayso inaad wax ka bedesho meesha wax laguugu soo diro u sheeg Barnaamijka Companion Card program adoo buuxinaya foomka Bedelida/bedelaada faahinta.

Si aad u hesho Bedelida/bedelaada foomka faahfaahinta, booqo websaytka ama telefoon u dir Khadka macluumaad Companion Card si aad u cadsato in boostada laguuggu soo diro.

Hellida macluumaad badan oo ku saabsan Companion Card

Websaytka Companion Card

www.companioncard.org.au

Websaytkaani wuxuu bixiyaa maclumaad badan oo ku saabsan barnaamijka Companion Card, tarjumaada macluumaadka muhiimka ah, jawaabaha suáallaaha badanaa la isweydiiyo, iyo meelaha lagala xiriirayo suáallaha badanaa la isweydiiyo.

Koobiyada buugga gacanta ee la tarjumay, foomka oo Ingiriis ku qoran, iyo foomam badan oo kale oo ku saabsan Companion Card ayaa lagala soo bixi karaa websaytka.

Khadka Macluumaadka ee kaarka Companion Card

Ogsoonow: Khadka macluumaadka Companion Card wuxuu kaa caawimi karaa keliya waxweydiimaha la xiriira Companion Card.

Shaqaalaha khadka macluumaadka Companion Card ayaa la helli karaa waqtiga shaqada si ay uga jawaabaan waxweydiinta ku saabsan Barnaamijka Companion Card program waxayna isla markaas kaa caawimi karaan su'aallaha foomka dalabka.

Koobiyada buugaagta la tarjumay, foomka oo Ingiriis ku qoran, iyo foomam badan oo kale waxaa laga helli karaa khadka macluumaadka ee Companion Card.

Wac 1800 650 611 (Afka Ingiriiska keliya)

Haddii aadan ku hadlin Ingiriis, waxaa lagugu xiri karaa Khadka Macluumaadka Companion Card iyadoo uu mutarjum khadka kugu caawimayo adoo wacaya khadka macluumaadka luqadaha kala duwan ee ku shaqada leh. (Arag sida lagu helli karo khadka macluumaadka adoo isticmaalaya khadka Luqadaha kala-duwan).

Sidee lagu helli karaa khadka luqadaha kala duwan ee macluumaadka Companion Card?

Khadadka Macluumaadka ee Luqadaha kala-duwan waxay 24ka saacadood bixiyaan macluumaad duuban. Waxay kaloo ku xiri karaan soo wacayaasha mutarjumiin si ay ula hadlaan khadka Macluumaadka Companion Card saacadaha shaqada.

Nambarada telefoonada Khadka Macluumaadka Luqadaha kala-duwan

Amxaarig	1300 305 601
Carabig	1300 305 602
Kaantoniis	1300 305 603
Karaweeshiyan	1300 305 604
Greek	1300 305 607
talyaani	1300 305 608
Masidooniyan	1300 305 609
Mandarin	1300 305 610
Bolish	1300 305 612
Raashiyan	1300 305 613
Serbiyan	1300 305 614
Somalí	1300 305 615
Isbaanish	1300 305 616
Turkish	1300 305 617
Fiyatnaamiis	1300 305 618
Luqadaha kale	1300 305 619

Macluumaadka loo baahan yahay si loo buuxiyo foomka dalabka qofka kaar sita

Talaabooyinka loo maro dalbashada:

Talaabada 1aad: akhri buugga qofka sita kaarka.

Talaabada 2aad: buuxi foomka dalabka oo Ingiriisa ku qoran. Waxaad buuxin kartaa footakoobiga foomka dalabka.

Talaabada 3aad: ku xir laba sawir oo ah nooca baasaboorka oo aad u muuqda.

Talaabada 4aad: ha saxiixo foomka dalabka iyo sawirada qof leh aqoon caafimaad/adeeg bixiye sida lagu sharxay "Cadaymaha Mihnadlaha" hoosteeda.

Talaabada 5aad: ku soo celi foomka dalabka galka warqada lagu siiyey (ama gal ah C4) oo ku socota:

Companion Card Applications
Locked Bag 3014,
Hawthorn VIC 3122.

- Ku dheji istaamka saxda ah
- Ha isku laabin foomka dalabka
- Ha ku dhejin bogag siyaada ah
- Sinaba looma soo celin karo dalabyada iyo sawirada
- Dalabyada aan buuxin, oo ay ku jiraan kuwa aan la saxiixin lama aqbali karo.

Macluumaadka guud

Waxaa laga yaabaa in lala xiriiro dadka ku qoran foomkaaga si loo weydiiyo inay cadeeyaan macluumaadka aad bixisay.

Fadlan ogsoonow: waxaa jirta ciqaab haddii lagu bixiyo macluumaad beena foomka dalabka.

Dalabyada waxaa loo buuxiyaa qofka iinta leh, oo aan lagu qorin magaca qofka la socda ama ururka. Waa in hal dalab loo buuxiyaa halkii dalbadebe.

Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad hesho saxiixa qof mihnad leh si uu u cadeeyo macluumaadka aad ku buuxisay foomka dalabka. Waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad u dirto dalabka iyo sawirada qofka mihnadlaha aah haddii aad midaas kala hadashay iyaga.

Sawirada

Waxaa lagaaga baahan yahay inaad ku soo lifaaqdo foomkaaga laba sawir oo nooca baasaboorka ah.

Sawirkaaga waxaa lagu daabici doonaa Companion Card, sidaas darteed xaqiiji in sawirka dhowaan la qaaday waadaxna uu yahay.

Waxaad u baahan tahay inaad ku xirto dalabka sawirka adoo kula qabanaya paperclip hana isku laabin. Hana isticmaalin tape, staples, glue ama pins.

Sawir walba gadaashiisa waa in lagu qoraa:

A) Magaca qofka sawirka ka muuqda; iyo
B) Saxiixa mihnadlaha saxiixay foom ka dalabka.

Barnaamijka Companion Card program wax lacag ah ka soo celin maayo kharajyada la xiriira helitaanka cadaynta iyo sawirada.

Su’aallaha dalabka

- Waxaa jira qodob lagugu weydiinayo haddii kani yahay dalab cusub, ama mid la cusboonaysiinayo. Haddii dalabku yahay mid cusboonaysiin ah, waxaad u baahan doontaa inaad sheegto nambarka kaarka.
- Waxaa jira qodob ku weydiinaya faahfaahinta shakhsiyeed. Midaan waxaa ku jira magacaaga, taariikhda aad dhalatay iyo meesha lagaala soo xiriirayo.
- Waxaa jira qodob lagugu weydiinayo sanduukhee ayaa tilmaamaya iintaada. Masaalla ka mid ah ayaa la bixiyey kuwaas oo laga yaabo inay keeni karaan iinta. Waxaad kaloo u baahan tahay inaad bixiso sharaxaad mucayina oo caafimaadkaaga. Haddii aanay jirin wax si rasmi ah lagugu sheegay waa inaad sharaxdaa xaalladaada caafimaad.
- Waxaad sheegtaa haddii iintaadu tahay mid joogta ah ama laga yaabo inay noqoto joogto. Haddii iintaadu AANAY AHAYN joogto ma aad lihid shuruudaha lagu hello Companion Card. Fadlan eeg "Maxaa dhacaya haddii anan hellin Companion Card?" Qayb ka mid ah buuggaan ayaa sii sharxaya macluumaadka lagu hello goobaha ganacsiga iyo munaasabadaha.
- Qodob kale ayaa ku weydiin doona haddii lagu siiyo adeegya mucayina ama kaalmooyinka la soo sheegay ama qoray.
- Waxaa jira qodob ku weydiinaya sababta aad ugu baahan tahay qof kula socda si uu kaaga caawimo xarakaadyada bulshada:

  Wada Xiriirka

  Barashada, Qorshaynta, fekerka

  Awooda socodka

  Is daryeelida

Qeexitaano:

Wadaxiriirka: wuxuu khuseeya in aad fahamto iyo in lagu fahmo. Haddii iintaadu waxyeellayso la xiriiridaada dadka kale waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad ka qaybgasho munaasabad dadweyne kaalmo laáan dhibaatooyin bulsho, dareen iyo dabeecad darteed. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato in qof kula socdo si aad u dalbato cunto, u gadato tigidho, u hesho kursigaagii, safka u gasho, ama qofkaasi kaa caawimo la xaalida cabsida, waxyaallaha iskaa tusa, khalad fahamka markaad joogto meel dadka u dhexaysa.

Barashada, qorshaynta iyo fekerida: waxay khusaysaa iinta la xiriirta xusuusta, fahmida iyo isdirka. Haddii iintaadu waxyeellayso waxbarashadaada, qorshaynta ama fekeridaada waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad si madaxbanaan u qorshaysato aadna fuliso xarakaadyada bulshada. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato caawimada qof ku raaca si uu kuugu hayo lacagta si aad u gadato waxyaalla sahlan, si aad u xassuusato meeshaad joogto ama u ogaato waxaad samaynayso munaasabada mucayina.

Awoodida socodka waxay khusaysaa aadida dibada ama soo wareegida. Haddii iintaadu waxyeellayso socodkaaga, waxaa laga yaabaa inaad u baahato qof ku raaca si uu kuugu wado kursiga, hagid, ama inaad hesho meeshaad rabto sida musqusha iyo meelaha wax laga cabo. Waxaa kaloo laga yaabaa inaad u baahato cid kula socota haddii aadan dhex mari karin bulshada dhexdeeda cabsi, iyo niyad xuma darteed.

Is daryeelida Isdaryeelidu waxay khusaysaa daryeelka shakhsiyeed oo ay ku jirto inaad naftaada amaangeliso. Haddii iintaadu waxyeesho isdaryeelidaada, waxaa laga yaabaa inaad u baahan tahay in lagaa kaalmeeyo lebisida, musqusha, cuntada, ama ka ilaalinta naftaada wixii wax yeelli kara, iwm.

Qoraalka dalbadaha / Masuulka / Wakiilka

Waxaa lagu weydiistay haddii ay jiraan waxaad adiga iyo mihnadlahaaga caafimaadka ama adeeg bixiyuhu jeclaan lahaayeen inay noo sheegaan si ay u kaalmayso dalabkaaga.

Adiga masuulkaaga sharciga/wakiilku waxaad u baahan tihiin inaad saxiixdaan foomka dalabka. Saxiixaagu wuxuu u taagan yahay:

- Inaad fahamtay oo aqbashay shuruudaha qofka sita kaarka.
- In aadan awoodin inaad ka qaybgasho xaraakaadyada bulshada iyadoo qof aanu kula socon.
- Inaad fahamtay in buuxinta foomku aanay ballanqaadayn bixinta kaarka loo yaqaan Companion Card.
- Ogolaanshahaaga waxweydiinta oo uu samayey barnaamijka Companion Card program ama wakiilkiisu, si loo cadeeyo macluumaadka ku yaal foomka dalabka.
- Waxaad ka markhaanti kacaysaa in macluumaadka ku yaal foomku sax yahay.
- Inaad fahamtay inay dambi tahay inaad ku bixiso macluumaad beena foomka dalabkaan.

Waxaa kaloo lagu weydiiyey haddii aad raali ka tahay ka qaygelida qiimaynta mustaqbilka ee barnaamijka Companion Card program.

Cadaymaha mihnadlaha

Haddii aad hesho mid ka mid ah adeegyada ama kaalmada mucayinka ah ee ku qoran **foomka dalabka**, wakiilka barnaamijka/ hayáda adeegaas waxay u baahan tahay inay saxiixdo foomka dalabka iyo sawirada.

Haddii AADAN hellin adeegyada mucayinka ah ama kaalmada ku qoran **foomka dalabka**, mihnadlaha caafimaadku wuxuuu u baahan yahay inuu saxiixo foomka dalabka iyo sawirada.

Mihnadlaha caafimaadka saxiixi kara foomka dalabka iyo sawirada waxaa ka ka mid ah:

- Dhakhtarka guud (Registered Medical Practitioner)
- Kalkaaliyaha Caafimaadka oo diiwaangashan [(Registered Nurse (Division 1, 3 or 4)]
- Dhakhtarka Dabiici ku daawaynta (Registered Physiotherapist)
- Dhakhtarka Maanka (Registered Psychologist)
- Dhakhtarka Mihnada (Qualified Occupational Therapist)
- U Adeegaha Bulshada (Qualified Social Worker)
- Dhakhtarka Hadalka (Qualified Speech Pathologist)

Shuruudaha Qofka sita kaarka

1. Companion Card-ka waxaa loo isticmaali karaa keliya marka dadka kaarka wataa ay goáansadaan inay u baahan yihiin caawimada qof raaca si ay uga qaybgalaan munaasabadu/xarakaadyo gaara.

2. Qofka sawirkiisa iyo faahfaahintiisu ka muuqato Companion Card dushiisa ayaa isticmaali kara kaarka.

3. Tigidhada qofka la socda lama isticmaali karo iyadoo aanu la socon qofka kaarka iska lihi.

4. Kuwa sita kaarka Companion waxaa waajib ku ah inay u sheegaan munaasabada/ xarakaadka qofka ka shaqaynaya baahida ay u qabaan tigidka qofka raacaya markay ballanta samaysanayaan ama ay gadanayaan tigidkooda.

5. Aqbalaada kaarka Companion Card ma sheegayo in xaraakaadka/munaasabada la helli karo. Kuwa kaarka sita waxaa lagula talinayaa inay iska hubiyaan in la geli karo iyo in kale ka hor intaan ballanta tigidka la samaysan.

6. Waxa ugu yar oo la filan karaa waa in qolyaha xiriirka la leh kaarka ay siin doonaan qofka kaarka sita hal tigid oo qofka-la-socda lacag la'aan. Tigidkaas wax lacag ah lag aqaadi mayo.

7. Haddii qofka kaarka sitaa xaq u leeyahay in ka badan hal qof oo soo raaca iyo in kale waa inuu kala xaajoodaa qofka kaarka sitaa qofka wada xarakaadka/munaasabada marka tigidka la goosanayo.

8. Kaarka Companion Card waxaa loo isticmaali karaa in loo hello tigidh qofka-la-socda qofka iinta leh barnaamij kasta, adeegyada iyo fadhiyadana ay wadaan dadka ka shaqeeya hawlwadaagana la ah xarakaadyada/munaasabada.

9. Kaarka Companion Card waxaa la isticmaali karaa isagoo la shaqaynaya kaarka dhimista ee la aqoonsan yahay.

10. Kuwa kaararka wata waxaa waajib ku ah inay keenaan faahfaahinta kaarka Companion Card markay ballanta telefoon ku samaysteen, waxaana waajib ku ah inay soo qadimaan kaar aan dhicin markay tigidka qaadanayaan, marka kasta oo la weydiiyo inta hawshu socota. Haddii aanay dadka kaarka wataa keeni karin kaarka, waxaa laga yaabaa in qofka la socda tigidkiisa laga qaado.

11. Waa in kuwa hawlwadaaga ah la ah barnaamijka munaasabadaha/ xarakaadyada ka xaqiijiyaan kuwa kaarka wata inay awoodaan inay joogaan qof ahaan dhinaca qofka la socda. Qofka la socdaa waa in uu ag joogaa qofka sita kaarka si uu u caawimo marka loo baahdo. Qofka sita kaarka oo u baahan kursi mucayina waa in uu sheegaa arrintaas markuu ka gadanayo kaarka qolada xarakaadka/munaasabada.

12. Hawlwadayaasha munaasabada/ xarakaadka ayaa laga yabaa inay ku weydiiyaan inaad bixiso in ka badan qiimaha guud oo la iska rabo (lacagta fuulida oo lagu daray lacagta gelida sida meelaha baagaga fanka). Kuwa ay hawlwadaaga yihiin ee munaasabada/xarakaadku waa inay siiyaan tigidka qofka la socda labada ogolaanshaba iyo wixii raacaba sida fuulida iwm, haddii qofka kaarka wataa u arko inuu u baahan yahay si uu uga qaybgalo.

13. Kaararka Companion Cards waxaa loo isticmaali karaa in lala gato waxyaalla kale, si qofka kaarka wataa u gato waxyaalla la socda sida cuntada. Markaad ballanta samaysanayo si aad u gadato waxyaallaaha tigidka la socda, waa inay kuwa kaarka wataa weydiiyaan qofka ka shaqaynaya munaasabada/ xarakaadka, waxa la socda tigidka la siinayo qofka la socda isaga. Waa muhiim in kaalmada qofka la socda aan la carqaladayn haddii wixii la socon lahaa aanay ku jirin kan qofka la socda tigidkiisa (masalan, haddii aan cuntada lagu darin, qofka la socdaa waa inuu awoodaa inuu keeno ama hellaa si u suurtagelinaysa iyaga inay sii wadaan kaalmadii ay siinayeen qofka kaarka leh).

14. Ballansiga iyo sida lagu siinayo tigidhada qofka la socda waa in aanay ka adkaan sida caadiga ah ee tigid bixinta kuwa hawlwadaaga ay yihiin ee munaasabada/xarakaadka.

15. Haddii qolada hawlwadaaga la ahi ka shakiyaan in kaarka si khalada loo isticmaalayo, waxay wargelin karaan Companion Card program. Kaarka oo si xun loo isticmaalaa wuxuu keeni karaa in qofka laga qaado, qofkaasina dib uma dalban karo.

16. Waxaa la aaminsan yahay in qofka qaadanaya Companion Card aqbalay shuruudaha markay qadimayeen dalabka qofka kaarka qaadanaya.

Macluumaad siyaada ah

Wixii macluumaada ee intaas ka badan oo khuseeya adeegyada kale ee iinta

Websaytka Online-ka ah rugtiisa

www.disability.vic.gov.au

Yellow Pages

Arag "Disability Services and Support Organisations" oo ku yaalla the Yellow Pages.

Department of Human Services Intake and Response Team Waxay bixiyaan macluumaadka ku saabsan kaalmada dadweynaha iyo adeegyada dadka iinta qaba, qoysaskooda iyo daryeellayaasha meelaha aad degan tahay. Wac 1800 783 783

Macluumaad siyaada ah oo khuseeya adeegyada iinta iyo xuquuqdaada

Takoorida iintu waa sharci daro sida waafaqsan sharciga Dawlada Dhexe. Haddii aad dareento in lagu takooray, waxaa laga yaabaa inaad ka hesho macluumaad intaas ka badan meelaha soo socda:

Victorian Legal Aid waxay bixisaa talo sharci waxayna qareen kaaga noqon karaan maxkamada haddii aad munaasib u tahay gargaarka sharciga.

Wac (03) 9269 0234 (magaalaweynta) ama 1800 677 402 (meelaha magaalada ka baxsan)

Xarumaha Sharciga ee Xaafaduhu waxay bixiyaan caawima sharci oo lacag laáana. La xiriir Xarumaha Federation of Community Legal Centres si aad uga hesho faahfaahin xarunta sharciga ee kuugu dhow:

Wac (03) 9602 4949

El Disability Discrimination Legal Service waa adeeg sharci oo bulsho oo ku takhasusaya sharciga wuxuuna bixiyaa macluumaad lacag laáana, kaalmo iyo caawimaad.

Wac (03) 9602 4877 (Cod) ama
03 9602 4135 (TTY) ama
Email: **info@ddls.org.au**

Villamanta Legal Service waa adeeg sharci oo bulsho kaas oo bixiya macluumaad lacag laáana iyo talo, wuxuuna ku takhasusay iinta la xiriirta arrimaha sharciga.

Wac 1800 014 111 (Waa lacag laáan Fiktooriya dhexdeeda)

Equal Opportunity Commission Victoria (EOCV)
Hayada EOCV waxay bixisaa macluumaad ku saabsan masuuliyaadka iyo xuquuqda u sinaanta fursadaha iyadoo adeegsanaysa Khadkeeda Talabixinta waxayna ka caawintaa dadka xal u helida dacwooyinka takoorida aan sharciga ahayn ama dhibaataynta iyadoo adeegsanaysa adeega heshiisiinta. Adeegyadaani waa lacag laáan, qarsoodi aan dhinacna raacsanayn.

Wac: (03) 9281 7111
Lacag laáan: 1800 134 142
TTY: (03) 9281 7110
Fakis: (03) 9281 7171
Websaytka: www.eoc.vic.gov.au
E-mail: eoc@vicnet.net.au

Human Rights and Equal Opportunity Commission

Waxbarashada Xuquuqda aadanuhu waa mid ka mid ah kuwa ugu muhiimsan masuuliyaadka guddiga oo uu dhinac socdo baaritaanka iyo xal u raadinta dacwooyinka ku saabsan ku xadgudubka xuquuqda dadka iyo sharciga lidka-takoorida.

Wac: (02) 9284 9600
Websatka: www.humanrights.gov.au
Waxweydiinta guud iyo qoraalla:
1300 369 711
TTY: 1800 620 241
Fakis: (02) 9284 9611
Khadka dacwooyinka: 1300 656 419 ama
complaintsinfo@humanrights.gov.au

Barayfasiga

Macluumaadka la siiyey barnaamijka Companion Card program waa la duubi doonaa waxaana lagu kaydin doonaa barta-xogta (database) waxaana loo isticmaali doonaa keliya arrima la xiriira maamulida barnaamijka Companion Card program iyo, marka ogolaansho la hello, ujeedo qiimayneed.

Laguu soo diri maayo wax qalab ah oo la xiriira barnaamijka Companion Card program. Macluumaadka cidna lala qaybsan mayo, mana isticmaali doono ama ogaan mayo qof aan ku jirin maamulka, ama qiimaynta barnaamijka. Macluumaadka la bixiyey waxaa lagu helli karaa codsi la mariyo xafiiska Freedom of Information.

Macluumaadka la bixiyey waxaa loo dhaqayaa sida waafaqsan mabaadiida barayfasiga ee ku jirta xeerka Diiwaanada Caafimaadka 2000 (Vic), Xeerka diiwaanada caafimaadka 2001 (Vic) iyo Wasaarada Adeegyada Aadanaha nadaamkeeda barayfasiga.

Wixii macluumaada ee ku saabsan barayfasiga, waxaad tixraaci kartaa:

- The Department of Human Services
  www.dhs.vic.gov.au/privacy
- The Health Services Commissioner
  www.health.vic.gov.au/hsc/
- The Privacy Commissioner for Victoria
  www.privacy.vic.gov.au

Companion™ card.org.au

www.companioncard.org.au